

KU DHAQAN XAFIIS D.



Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad

Muddisho, 1 Oktoober 1974

L. 10

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudee'eeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 32, Tr. 19 Agosto 1974 — *Awoodda Wasaaradda Maaliyadda ay kula wareegi karto macaashka Bankiyada, Wakaaladdaha, Wershadaha iwm.*

Bog. 447

SHARCI L. 33, Tr. 5 Seb. 1974 — *Cashuurta guryada.*

» 448

BOGGA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, Tr. 28 Maaris 1974, L. 97 — *Magacaabid Agaasimaha Guud ee Bankiga Horumarinta Soomaaliya.*

» 450

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, Tr. 31 Agosto 1974, L. 98 — *Shaqo ka fahiisin saraakiil Bolis ah.*

» 451

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, Tr. 1 Seb. 1974, L. 99 — *Magacaabid Gudoomiye Gobol.*

» 452

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, Tr. 1 Seb. 1974, L. 100 — *Magacaabid Gudoomiye Gobol.*

» 453

| | |
|---|----------|
| DECREE OF THE SECRETARY OF STATE FOR INTERIOR, 29 July 1974, L. 101 — <i>Amendment Local Government Conduct of Business Regulations No. 84 of 14th July 1973.</i> | Bog. 454 |
| WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 17 Agosto 1974, L. 102 — <i>Magacaabid Idaarada Guddiga Ka-caanka Degmada Beled Xaawo qaybtiisa Wakiilada Beesha.</i> | » 455 |
| WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA, Tr. 6 Agosto 1974, L. 103 — <i>Qiimaha Maydiga.</i> | » 456 |
| WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA, Tr. 6 Agosto 1974, L. 104 — <i>Qiimaha Sonkorta.</i> | » 457 |
| WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA, Tr. 6 Agosto 1974, L. 105 — <i>Qiimaha Boriiska Waddanka laga beero.</i> | » 458 |
| WASAARADDA BOOSTA IYO ISGAADHSIINTA, Tr. 14 Agosto 1974, L. 106 — <i>Kirada Sanaadiiqda Boosaha.</i> | » 459 |

BOGGA SEDEXAAD

TALOOPYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

| | |
|---|----------|
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul <i>Jaalle Maxamed Cali Mowlaana. (202)</i> | Bog. 450 |
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul <i>Jaalle Yuusuf Maxamed Sheekh. (203)</i> | » 461 |
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul <i>Jaalle Maryan Nuur Shariif. (204)</i> | » 261 |
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul <i>Jaalle Cabdi Cali Maxamed. (205)</i> | » 462 |
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul <i>Jaalle Xasan Maxamuud Maxamed. (206)</i> | » 462 |
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul <i>Jaalle Cabdi Cali Cigaal. (207)</i> | » 463 |
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul <i>Jaalle Cabdalla Yaslem Cabdalla iyo Saciid Yaslem Cabdulla. (208)</i> | » 463 |
| BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED — Ogeysiis <i>Heerka Sarrifka lacagaha qalaad. (209)</i> | » 464 |
| BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED — Ogeysiis <i>Heerka Sarrifka lacagaha qalaad. (210)</i> | » 465 |
| WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis Naada Dhul <i>Jaalle Jeylaani Maxamed Abu. (210 Bis)</i> | » 466 |

SHARCI L. 32, Tr. 19 Agosto 1974.

Awcodda Wasaaradda Maaliyadda ay kula wareegi karto macaashka Bankiyada, Wakaaladaha, Wershadaha, iwm.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo ta 2aad ee Kacaanka Oktoober 1969;

ISAGOO TIXGELINAYA Go' aankii Golaha sare ee Kacaanka iyo Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Wasaaradda Maaliyadda, iyadoo daryeelaya horukaca dhaqaalaha dalka, waxaawood loo siiyey inay isticmaasho ama la wareegto wixii macaash ah ee ay keenaan Wakaaladaha, Bankiyadu iyo Warshadaha ama wixii lacag ah ee kale ee inay isticmaalaan aanay markaas u baahnayn.

Qodobka 2aad

Wasaaradda Maaliyaddu waa inay siiyo Wakaaladaha, Bankiyada iyo Wershadaha wixii lacag ah ee ay u baahanyihiin si ay hirgeliyaan mashaariicda horumarka ah ama waxyaalihii kale ee ay uga baahdaan xagga dhaqaalaha.

Qodobka 3aad

Madaxweynahu isagoo la tashanaya Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda, wuxuu soo saari doonaa xeerar hoose oo lagu hirgelinayo qodobada sharcigan.

Qodobka 4aad

Sharcigani waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxeexo Guddoonshaha G. S. K. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Dawladda.

Muqdisho, 19 Agosto 1974.

Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

SHARCI L. 33, Tr. 5 Seb. 1974.
Canshuurta Guryaha.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Go'aankii 1aad kan 2aad ee Kacaankii 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Qodobka 30aad ee Sharciga 14 Agoosto 1963, tiradiisuna tahay 19 iyo baddalka ka dambeeyey ee caddeynayay Cashuurta iyo xuquuqda ay Dawladaha Hoose qaadi karaan.

MARKUU ARKAY Sharciga 1d Agoosto 1966, tiradiisuna tahay 12 ee ku saabsan baaridda iyo ciqaabta lagu qaado jabinta Sharciyada Dhaqaalaha.

MARKUU OGAADAY In loo baahan yahay in la soo saaro Sharci ciqaabaya qofkii bixin diida cashuurta ay qaadaan Dawladaha Hoose ee Degmooyinka oo ah Cashuurta Guryaha Carshaanta ah, Baraakooyinka iyo wixii kale oo la mid ah (Imposta fissa sulle abitazione tradizionale) iyo cashuurta Qiimaha Guryaha Daaraha ah (Imposta proporzionale sul valore accertato dei fabbricati).

MARKUU ARKAY Taladii uu soo jeediyay Xoghayaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee uu ogaaday in ay tahay lagama maarmaan in awood loo siiyo Dawladaha Hoose ee Degmooyinka in ay ka qaadi karaan tilaabooyinka Sharcigaan uu u oggolaanayo qofkii bixi waaya cashuurta kor ku qoran.

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha.

WUXUU DEJINAYAA SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Waqtiga cashuurta lagu bixinayo

Cashuurta qiimaha guryaha daaraha ah iyo midda guryaha carshaanta, baraakooyinka iyo wixii kale ee la mid ah, waxaa la bixinayaa sannad kastaba 31ka Jannaayo ilaa 31ka Maayo.

Qodobka 2aad

Bixin qaybqayb ah (pagamento a rate)

Qofkii lagu leeyahay cashuur ka badan hal sanno ee aan awoodi karin in uu mar qur ah bixiyo, waxaa u banaan in uu seddex qaybood (a rate) u bixiyo cashuurta lagu leeyahay ilaa muddo 6 bilood ah.

Qodobka 3aad

Ganaax muddo daah ah (diritto di mora)

Haddii cashuurta ku qoran qodobka 1aad lagu bixin waayo ilaa 31ka Maayo, ganaax muddo daah ah (diritto di mora) oo ah 5% ayaa qofkaas la saari doonaa ka billaabato 1da Juunyo ilaa 30ka Juunyo cashuurta lagu leeyahay.

Qodobka 4aad

Xayiraad

1. Qofkii ku bixin waaya cashuurta ku qoran qodobka 1, ilaa 30ka Juunyo Dawladaha Hoose ee Degmooyinka waxay awood u leeyihiin haddii guriga cashuurta lagu leeyahay ijaar loogu jiro inay ka qaataan ijaarka dadka ku jira ilaa cashuurta lagu leeyahay ay ka dhamaato, ayadoo qofka guriga leh la siin doono warqad marqaati fur ah;

2. Haddii guriga cashuurta lagu leeyahay ijaar aanan loogu jirin, cashuurtana lagu bixin waayo ilaa 30ka Juunyo, Dawladaha Hoose waxay awood u leeyihiin:

- (a) inay sugaan inta guriga la ijaaranayo;
- (b) in qofka guriga lehi uusan gadi karin guriga ilaa lacagta Dawladda Hoose ku leedahay ay ka dhammaato.

Qodobka 5aad

Ka dhaafid (esenzione)

Dawladaha Hoose waxay awood u leeyihiin inay siiyaan warqad caddaynaysa (certificate of bankruptcy) qofkii:

- (a) gurigiisa ku jira ee ay ogaadaan inuusan shaqaysan karin iyadoo ay ugu wacan tahay waayeeelnimo ama jirro (per vecchiaia o per malattia);
- (b) gurigiisa ku jira ee ay caddaato inuusan waxba haysanin, nullo-latente).

Qodobka 6aad

Baabi'n (abrogazione)

Sharci kasta ee ka soo horjeeda sharcigaan waa la baabi'yey.

Qodobka 7aad

Dhaqangalid

Sharcigaan wuxuu dhaqan galayaa maalinta lagu soo saaro warqad-da Rasmiga ah ee Dawladda (Bollettino Ufficiale).

Wuxuuna ka mid noqon doonaa Sharciyada u degsaan Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaalida kuna saabsan Degmooyinka.

Muqdisho, 5 Seb. 1974.

S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

S. Gaas Xuseen Kulmiye Afrax

Xoghayaha Wasaaradda Gudaha

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 28 Maarso 1974, L. 97.

Magacaabid Agaasimaha Guud ee Bankiga Horumarinta Soomaaliyeed.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka iyo sharciga Lamb. yahay 1 ee soo baxay 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Qodobka 18aad ee sharciga tir. 25 soona baxay 30 Abril 1970;

ISAGOO ARKAY Qodobka 27 ee Xeerka Guddoonsaha Golaha Sare ee Kacaanka, Lamb. yahay 211 soona baxay 22 Settem. 1970;

ISAGOO TIXGELINAAYA Baahida loo qabo in la dajiyo Xeer lagu magacaabayo Agaasimaha Guud ee Bankiga Horumarinta Soomaaliyeed;

ISAGOO DHEGEYSTAY Galaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha;

ISAGOO TIXGELIYEY Go'aankii Guddiga Maamulka Bankiga Horumarinta Soomaaliyeed ee taarikh. 20-3-1974;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodob qurah

Marka laga bilaabo 1 Marso 1974 Jaalle Maxamuud Maxamed Nuur, waxaa lagu magacaabay Agaasimaha Guud ee Bankiga Horumarinta Socmaaliyeed.

Muqdisho, 28-3-1974.

Jaalle Gaas Maxamed Siyaad Barre
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

VISTO e registrato - Reg. n. 4, foglio n. 63.

Mogadiscio, li 8 Settembre 1974.

Il Magistrato ai Conti:

Ten. Col. ABDULLAHI WARSAME NUR

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 31 Agosto 1974, L. 98.

Shaqo ka fadhiisin saraakiil Bolis ah.

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Qodobka 19aad xubinta 1aad xarafka (b) ee Sharciga 14aad ee 4-1-1973 ee Dhismaha Ciidanka Boliiska;

ISAGOO ARKAY Qodobka 11 iyo 12 ee Sharciga 6 ee 31-12-1969, kuna saabsan xaqa iyo abaalgudka Ciidamada Qalabka Sida (Pension and Gratuity);

ISAGOO ARKAY Taladii uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliisku kuna soo sheegay SEC-PO-3 ee 6-8-1974;

ISAGOO AQOONSADAY Inaanay Saraakiisha hoos ku magacaabani shaqada wadi karayn caafimaad darro awgeed;

ISAGOO DHEGAYSTAY Ha'yigii Xoghayaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

WUXUU XEERAY
Qodobka 1aad

In Saraakiisha hoos ku magacaaban oo ka tiraan Ciidanka Boliiska shaqada laga fadhiisiyo marka laga bilaabo 6-8-1974 caafimaad darro awgeed:

1. G. Sare Cumar Maxamuud Nimcaale
2. G.le Xuseen Geeddi Isaaq
3. G.le Calinuur Faarax
4. Damme Maxamed Yuusuf Cilmi.

Qodobka 2aad

Saraakiishaasi waxay xaq u yeelan doonaan wixii xaq ah ee uu siiyo sharciga 6 ee 31-12-1969 ee xaqa iyo abaalgudka Ciidamada Qalabka Sida.

Qodobka 3aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa waxaana lagu dhigi doonaa faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 31 Agosto 1974.

S. Gaas Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA GSK

S. Gaas Xuseen Kulmiye - GSK
Xoghayaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha
VISTO e registrato - Reg. n. 4, foglio n. 35.
Mogadiscio, 1 Settembre 1974.
Ten. Col. ABDULLAHI WARSAME NUR

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 1 Seb. 1974, L. 99.
Magacaabid Guddomiye Gobol.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii Kowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Qodobka Todobaad ee Xeerka Lambarkeedu yahay 52 soona baxay Sideedii Juun, 1972dii;

ISAGOO ARKAY Xaashidii XGM-GSK-41-1-47768 ee 20-7-1974 ee lagu magacaabay in uu noqdo Guddoomiye Gobalka Sannag;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii Xoghayaha Dowladda ee Wa-saaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in la magacaabo Guddoo-miye Gobalka Sannag;

WUXUU GOOYEV

Qodobka 1aad

In Gaashanle Sare Maxamuud Muusa Xersi uu Guddoomiye ka noqdo Guddiga Kacaanka Gobalka Sannaag, marka laga bilaabo Taa-riikhda 20-7-1974.

Qodobka 2aad

Go'aankaas wuxuu dhaqan geliyaa si degdeg ah waana in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 1 Seb. 1974.

MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

S. Gaas Xuseen Kulmiye Afrax
Xoghayaha Dowladda ee Arrimaha Gudaha

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 1 Seb. 1974, L. 100.

Magacaabid Guddoomiye Gobol.

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii Kowaad iyo Tii Labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Qodobka Todobaad ee Xeerka Lambarkeedu yahay 52 soona baxay Sideedii Juun, 1972dii;

ISAGOO ARKAY Xaashidii XGM-GSK-13-4648 ee 7-5-1974 ee lagu magacaabay in uu noqdo Guddoomiye Gobalka Bari;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii Xoghayaha Dowladda ee Wa-saaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in la magacaabo Guddoomiye Gobalka Bari;

WUXUU GOOYEE

Qodobka 1aad

In Gaashanle Axmed Maxamed Ciise uu Guddoomiye ka noqdo Guddiga Kacaanka Gobalka Bari, marka Taariikhdu ahay 7-5-1974.

Qodobka 2aad

Go'aankaas wuxuu dhaqan geliyaa si degdeg ah waana in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 1 Seb. 1974.

S. Gaas Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

S. Gaas Xuseen Kulmiye Afrax
Xoghayaha Dowladda ee Arrimaha Gudaha

DECREE OF THE SECRETARY OF STATE FOR INTERIOR

29 July 1974, N. 101.

Amendment Local Government Conduct of Business Regulations No. 84 of 14th July 1973.

THE SECRETARY OF STATE FOR INTERIOR

HAVING SEEN The 1st and 2nd Charte of the Revolution;

HAVING SEEN Law No. 52 of 8th June, 1972 (Local Government Reform Law) as subsequently amended;

HAVING SEEN The regulation No. 84 of 14th July 1973 concerning Local Government conduct of business regulations 1973;

CONSIDERING it necessary to amend the above Regulation;

HEREBY DECREES

Article 1

At the end of the art. 51 of the above Regulation is inclosed the following additional number:

8. By-laws shall go into effect after one months from the date of their passage unless varied or revoked by the Regional Revolutionary Council or the Secretary of State as the case may be.

Article 2

This Decree shall come into force immediately and shall be published in the Official Bulletin.

Mogadiscio, 29 July 1974.

Major Gen. Hussein Kulmiye Afrax

Secretary of State for Interior

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

Tr. 17 Agosto 1974, L. 102.

Magacaabid Idaarada Guddiga Kacaanka Degmada Beled Xaawo Qeybtiisa Wakiilada Beesha.

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida Kowaad iyo Tan Labaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu yahay 52 ee 8dii Juunyo 1972 ee lagu maamulo Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeerka Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka ee Lambarkiisu yahay 49 ee 8dii Bisha Febraayo 1973 ee lagu dhisay Gobalada iyo Degmooyinka cusub;

ISAGOO OGAADAY In ay tahay lagania maarmaan in la magacaabo Wakiilada Beesha ee Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada xagga sare ku qoran;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladi Guddiga Kacaanka Gobolka Gedo.

WUXUU GOOYEE

Qodobka 1aad

Ka billaabanta taariikhda xeerkan dadka magacyadoodu halkan hoose ku qoran yihiin waxaa loo magacaabay in ay noqdaan Idaaradda Guddiga Kacaanka Degmada Beled Xaawo Qeybta Wakiilada Beesha:

1. Maxamed Cali Cumar,
2. Xaaji Yuusuf Muuse Cali,

4. Xaaji Cali Aadan Maxamed,
5. Faaduma Abiikar Maxamed,
6. Maxamed Cusmaan Cabdulleh,
7. Buraale Xasan Maxamed,
8. Xaajir Sheekh Maxamed Aadan,
9. Sheekh Cabdulqaadir Sh. Xasan Xaaji Mursal.

DHAQAN GAL
Qodobka 2aad

Xeerkani isla maanta ayuu dhaqan geli waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 17-8-1974.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda

Arrimaha Gudaha

S. Gaas Xuseen Kulmiye

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 80.

Mogadiscio, li 2 Settembre 1974.

Il Magistrato ai Conti:

Ten. Col. ABDULLAHI WARSAME NUR

WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA

Tr. 6 Agosto 1974, L. 103.

Qiimaha Maydiga.

XOGHAYAHA DAWLADDA

MARKII uu arkay go'aanka 1d. iyo kan 2aad. ee kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

MARKII uu arkay Sharciga lambarkiisu yahay 17ka oo soo baxay 17ka Juun 1967 ee ku saabsanaa ilaalinta qiimaha Alaabta lagama maarka ah;

MARKII uu arkay Xeerka lambarkiisu yahay 52 oo soo baxay 15ka Febraayo 1972, kuna saabsanaa qiimaha Beeyada iyo Maydiga;

AYADO la dhaqan gelinaaya go'aankii ay gaareen labada Gole; Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU DEJINAAYAA XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Qiimaha Maydiga ay Wakaaladda Ganacsiga Ummadda kaga galanaysa Xijilayda, wuxuu noqondoona sida aanu u goynay ee hoos ku qoran, laga bilaabo 7da Agoosto 1974:

| | | Qiimaha WGU (ENC) kaga gadanaysa Xijilayda kiiladii |
|---------------------------|---------|---|
| Maydiga: Derejada Koowaad | Sh. So. | 8,50 |
| » » Labaad | » » | 5,00 |
| » » Saddexaad | » » | 1,50 |
| » » Afraad | » » | 1,00 |

Qodobka 2aad

Xeerkaan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah, wuxuu tirayaa Xeer kastoo ka soo horjeeda. Waxaa lagu amrayaa qof waliba in uu dhowro, dadka kalena dhowrsiiyo Xeerkaan isaga ah.

Muqdisho, 6 Agosto 1974.

XOGHAYAHA DAWLADDA

Sax. Jaalle Axmed M. Maxamuud

WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA

Tr. 6 Agosto 1974, L. 104.

Qiimaha Bariiska Waddanka laga Beero.

XOGHAYAHA DAWLADDA

MARKII uu arkay Go'aankii 1aad iyo kan 2aad ee kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

MARKII uu arkay Sharciga Lambarkiisu yahay 17ka ee soo baxay 17-6-1967, kuna saabsanaa ilaalinta qiimaha alaabta lagama maarmaanka ah;

MARKII uu arkay Xeerka Lambarkiisu yahay WGG-A-2-737 ee 2-6-1974, kuna saabsanaa qiimaha Bariiska Waddanka laga Beero;

AYADO la dhaqan gelinaayo go'aankii ay gaareen labada Gole: Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayasha Dawladda:

WUXUU DEJINAYAA XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Qiimaha Sonkorta wuxuu noqon doona sida aanuu u goynay ee hoos ku qoran, laga bilaabo 7-8-1974:

| Badeecadda | Qiimaha WGU (ENC) | Qiimaha D. Hoose | Qiimaha Dukaanleydu |
|--------------|--------------------------|--------------------------|---------------------------|
| | ay ku gadeyso Sh. So. | ay ku gadayso Sh. So. | ay ku gadayaan Sh. So. |
| Sonkorta Kg. | 4,3375 | 4,40 | 4,60 |

Qodobka 2aad

Xeerkaan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah, wuxuu tirayaa Xeer kastoo ka soo horjeeda. Waxaa lagu amrayaa qof waliba in uu dhowro, dadka kalena dhowrsiiyo Xeerkaan isaga ah.

Muqdisho, 6-8-1974.

XOGHAYAHA DAWLADDA

Sax. Jaalle Axmed M. Maxamuud

WASAARADDA CANACSIGA GUDAHA

Tr. 6 Agosto 1974, L. 105.

Qiimaha Sonkorta.

XOGHAYAHA DAWLADDA

MARKII uu arkay Go' aanka 1aad iyo kan 2aad ee kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

MARKII uu arkay Sharciga lambarkiisu yahay 17ka oo soo baxay 17ka Juun 1967 ee ku saabsanaa ilaalinta qiimaha alaabta lagama maanka ah;

MARKII uu arkay Xeerka lambarkiisu yahay 122 oo soo baxay 1da Dicembar 1973 kuna saabsanaa qiimaha Sonkorta;

AYADO la dhaqan gelinaaya go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Golaha Xoghayayaashaa Dawladda:

WUXU DEJINAYAA XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Bariiska Dalka ka baxa waxaa Wakaaladda Ganacsiga Ummadda kaga gadanaysaa Beeralayda, kiintaalkii, Sh. So. 250/- (laba boqol iyo konton).

Qodobka 2aad

Bariiska waa inuu ahaadaa kuwo saafi ah, galka laga bixiyay, kuna jira jawaan.

Qodobka 3aad

Bariiska waxaa beeraleyda ka gadan karaan Wakaaladda Ganacsiga Ummadda (ENC) oo qura.

Qodobka 4aad

Xeerkan wuxuu hirgalayaa 7-8-1974; waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda. Waxaa lagu amrayaa qof waliba in uu dhowro, ilaaliyana hirgelinta Xeerkaan isaga ah.

Muqdisho, 6-8-1974.

XOGHAYAHA DAWLADDA
Sax. Jaalle Axmed M. Maxamuud

WASAARADDA BOOSAHA IYO ISGAARSIINTA

Tr. 14 Sebtember 1974, L. 106.

K'rada Sanaadiiqda Boosaha.

XOGHAYAHA BOOSAHA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;
ISAGOO ARKAY Qodobka 21aad ee Shaaciga Boosaha Lambarkii-
suna Yahay 62 oo soo baxay 22kii Setember 1971;

ISAGOO ARKAY Degreetada Wasaaradda 12kii Disember 1971;
Lr. 287 oo taariifada Boostadu ay ku soo baxday;

ISAGOO TIXGELINAYA Baahida loo qabo in wax laga beddelo
kirada Sanaadiiqda Boostada;

ISAGOO LA TASHANAYA Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda;

WUXUU GUDDOONINAYAA
Qodobka 1aad

1. Kirada Sanaadiiqda Boostada ee bishiiba waxay noqon doontaa sidan:
- | | | |
|---|---------|-------|
| a) Sanaadiiqda waaweyn | Sh. So. | 20,00 |
| b) Sanaadiiqda yaryar | » » | 10,00 |
| c) Qimaha Furihiiba | » » | 10,00 |
| d) Qof kasta oo kula shirkaya iyadoo cidda sanduuqa lihi ay raali ka yihiin waxa laga qaadayaa kirada sanduuqa barkeed (50%). | | |
2. Kirada sanaadiiqda waxa lagu bixin karaa, hormaris ahaan, saddex bilood, lix bilood ama sannad.

Qodobka 2aad

Degreetadani waxay dhaqan geleysaa 1da Oktoobar 1974 waxana lagu faafinayaa Bollettino Ufficiale.

XOGHAYAHA BOOSAHA
G. Sare Axmed Maxamud Faarax

XOGHAYAHA MAALIYADDA
Maxamed Yusuf Weyrax

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Cali Mowlaana, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 14-8-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas raktaangolar ah 24x20 kuna fadhiya 480 mdh.

Soohdin:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Jid.

Koofur Waxaa ka xiga: Yuusuf Maxamed Sheekh.

Galbeed Waxaa ka xiga: Jidka Jen. Daud.

Bari Waxaa ka xiga: Salaad Cali Siyaad.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arkii karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon), maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 31 Agosto 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Maxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Yuusuf Maxamed Sheekh, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 14-8-1974ka, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas rektaangolaar ah 24x20 kuna fadhiya 480 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Maxamed Cali Mowlaana.

Koofur waxaa ka xiga: Abuukar Cali Siyaad.

Galbeed waxaa ka xiga: Jidka Jen. Daaud.

Bari waxaa ka xiga: Calasey Caddow Calasow.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arkii karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon), maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka daw-ladda.

Muqdisho, 31 Agosto 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Maxamed Cabdi Saciid

(203)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Maryan Nuur Shariif, maalintii 18-6-1968, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Wardhigley, Jidka Sh. Calawl iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa trabeiyo, addimihiisuna ahaayeen 18; 26; 30,70, kuna fadhiye 675,40 mdh., sababtoo ah in la beddelay naqshadii hore.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambar-keedu ahaa 998-1475-68 ee 21-7-1968 kana baxday xafiiskan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu wax trabesiyo addimihiisu yihiin 29 + 35x20 kuna fadhiya 640 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Iskaashatada Base Mudug.

Koofur waxaa ka xiga: Cabdi Cali Maxamed (Wardhigley).

Galbeed waxaa ka xiga: Booliska.

Bari waxaa ka xiga: Jid.

Muqdisho, 4 Setember 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
Maxamed Cabdi Saciid

(204)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cabdi Cali Maxamed (Wardhiigley), maalintii 18-6-68, loona ogolaaday oo ku yill Muqdisho degmada Wardhiigley, Jidka Sh. Clawl uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa trabesiyo, addimihiisuna ahaayeen 26; 32; 23,30, kuna fadhiye 675,70 mdh., sababtoo ah in, la beddelay naqshadii hore.

Sidaas aawadeed naadadii hore lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 1000-1476-68 ee 21-7-1968, kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa trabesiyo, addimihiisu yihiin 35 + 39x20, kuna fadhiya 740 mdh. soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Maryan Nuur Shariif.
Koofur waxaa ka xiga: Xasan Maxamuud Maxamed.
Galbeed waxaa ka xiga: Booliska.
Bari waxaa ka xiga: Jid.

Muqdisho, 4 Setember 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(205)

Maxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Xasan Maxamuud Maxamed, maalintii 18-7-67, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Wardhiigley, Jidka Sh. Calawl, uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa rektaangolar, addimihiisuna ahaayeen 45x45, kuna fadhiye 1575 mdh., sababtoo ah in naqshadii la beddelay.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa MWD-919-489-68 ee 29-4-1968, kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa L. (elle), addimihiisu yihiin 39x10 + 25x15 + 14x26, kuna fadhiya 1077 mdh., soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Cabdi Cali Maxamed (Wardhiigley).
Koofur waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed.
Galbeed waxaa ka xiga: Boliska iyo Zaawo Muuro.
Bari waxaa ka xiga: Jid.

Muqdisho, 4 Setember 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(206)

Maxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cabdi Cali Cegaal, maalintii 2-5-66, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan, Jidka Haw-Wadaag uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa rektaangolar, addimihiisuna ahaayeen 30x20, kuna fadhiye 600 mdh., sababtoo ah in la beddelay naqshaddii hore.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 932-605 ee 9-6-66, kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa L. (elle), addimihiisu yihiin 27; 27; 13,50, kuna fadhiya 546,75 soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid.
Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. 637 iyo Jid.
Muqdisho, 4 Setember 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(207)

Maxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cabdalla Yaslam Cabdalla iyo Saciid Yaslama Cabdalla, maalintii 21-8-68, loona

beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa rektaangolar addimihiisuna ahaayeen 30x12, kuna fadhiye 360 mdh., sababtoo ah in naqshadii hore la beddelay.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambar-keedu ahaa 2027-2757-68 ee 11-12-1968, kana baxday xafiiskan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa rektaangolar, addimihiisu yihiin 24x12, kuna fadhiya 288 mdh. soohdi-mihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Cali bin Mansur iyo Axmed Cumar.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid.
Bari waxaa ka xiga: Jid.
Muqdisho, 4 Setember 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(208)

Maxamed Cabdi Saciid

BANKIGA QARANKA SOOMAALIYED

XEER NIDAAMIYE LR. 62 EE 11-8-1974.

Heerka Sarrifka Frankiga Fransaha.

TALIYAHA IYO MAAMULAHA GUUD

ee

BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED

MARKA ARKEEN Qodobka 10aad ee Xeerka Lr. 12 soona baxay 29-9-1964 oo ku hirgalay Sharciga Lr. 8 ee 29-10-1964, kuna saabsan daadihinta Ganacsiga Dibedda iyo Sarrifka Lacagaha Qalaad loogu beddelan karo lacagteenna;

AYAGOO TIXGELINAYA Isbeddelka ka dhexdhacaya qiimaha lacagaha qalaad sida had iyo jeer laga soo tabiyo Sayladaha Caalamiga ah eelacagaha qalaad sida had iyo jeer laga soo tabiyo Sayladaha Caalamiga ah ee Sarrifka Lacagaha;

MARKAANA GARTEEN In la badbaadiyo lana dhowro dhaqaalaha iyo lacagta waddankeenna;

AYAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 160 ee 11-8-1974 sida Sharciga Bankiga Qaranka Soomaaliyeed Lr. 27 ee 26-11-1968 oo dhacayo;

WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka sarrifka lacagta Frankiga Fransaha ee horay loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoos ku qoran, laga bilaabo 12-8-1974, waxaana go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya:

| Lacagta qalaad | | Heerka Bankigu ku iibsanayo | Heerka Bankigu ku gadayo |
|----------------------|-------------------|--------------------------------|-----------------------------|
| FR. FR. 1 | Frankiga Fransaha | Sh. So. 1.3281 | Sh. So. 1.3546 |
| Muqdisho, 12-8-1974. | | | |

Cumar Axmad Cumar
Maamulaha Guud
(209)

Cabduraxmaan Nuur Xirsi
Taliyaha

BANKIGA QARANKA SOOMAALIYED

XEER NIDAAMIYE LR. 63 EE 22-8-1974.
Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.

TALIYAHA IYO MAAMULAHA GUUD
ee
BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED

MARKA ARKEEN Qodobka 10aad ee Xeerka Lr. 12 soona baxay 29-2-1964 oo ku hirgalay Sharciga Lr. 8 ee 29-10-1964, kuna saabsan daadihinta Ganacsiga Dibedda iyo Sarrifka Lacagaha Qalaad loogu beddelan karo lacagtcenna;

AYAGOO TIXGELINAYA Isbeddelka ka dhexdhacaya qiimaha lacagaha qalaad sida had iyo jeer laga soo tabiyo Sayladaha Caalamiga ah eelacagaha qalaad sida had iyo jeer laga soo tabiyo Sayladaha Caalamiga ah ee Sarrifka Lacagaha;

MARKAANA GARTEEN In la badbaadiyo lana dhowro dhaqaalaha iyo lacagta waddankeenna;

AYAGOO OGSOON In horay loo qaatay go'aan deg deg ah Lr. 161 ee 22-8-1974 sida Sharciga Bankiga Qaranka Soomaaliyeed Lr. 27 ee

WAXAY GUDDOONSHEEN

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horayna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga ah, uu ahaan doono sida hoo ka muuqata, laga bilaabo 24-8-1974, waxaana go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya:

| Lacagta qalaad | | | Heerka Bankigu ku iibsano | Heerka Bankigu ku gado |
|----------------|--------|---------------------|------------------------------|---------------------------|
| UK £ | 1 | Giniga Isterliinka | Sh. So. 14.6107 | Sh. So. 14.9029 |
| Dm. | 1 | Maarkaha Jarm. Gal. | » » 2.3820 | » » 1.4296 |
| Lit. | 105,23 | Liiraha Talyaaniga | » » 1.0000 | » » ——— |
| Lit. | 103,13 | » » | » » ——— | » » 1.0000 |
| Fr. Fr. | 1 | Frankiga Fransaha | » » 1.3015 | » » 1.3275 |

Muqdisho, 23-8-1974.

Cumar Axmad Cumar Cabduraxmaan Nuur Xirsi

Maamulaha Guud

Taliyaha

(210)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Jeylaani Maxamed Abu, uu u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 15-9-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dawladeed kuna yaal Muqdisho xaafadda 21k. Oktoober, oo leh qiyaas afar gees ah 200x200 kuna fadhiya 40.000 mdl.

Soohdin:

Woqooyi waxaa ka xiga dhul Dawladeed.

Koonfur Jidka 21ka Oktoober.

Galbeed Jidka Maxamuud Xarbi.

Bari Dhul Dawladeed.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa noqshadda dhulka oo taal qaybta dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaas waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maanlntii lagu naadshay xeerka dawladda.

Muqdisho, 21 Sebtember 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(210 Bie)

Maxamed Cabdi Saadiq